**GUNDERSEN HEALTH SYSTEM®**



| | |
|---|---|
| **Mowduuca** | Kaalmada Maaliyadda |
| **Nambarka Furaha** | GL-2555 |
| **Qeybta** | Wareegga Dakhliga (Revenue Cycle) |
| **Qeybta hoose** | Maamulka Wareegga Dakhliga (Revenue Cycle Admin) |
| **Nooca** | Shirkad |
| **Xariirka** | Laurie Hurwitz |
| **La Baddalay** | 10/17/2017 |

## Tixraacyada

GL-3001, EMTALA: Aruurinta Macluumaadka Maaliyadda
RevCycle-1055 Siyaasadda Biilasha Qofka Bixiyo iyo Aruurinta (RevCycle-1055 Self-Pay Billing & Collection Policy)
Tilmaamaha Saboolnimada Federaalka (Federal Poverty Guidelines), Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha Mareykanka (US Department of Health and Human Services)
Siyaasadda Dhimista Dhakhso u Bixinta Adeegyada Aan Xaqa Loo Lahayn sida hoos timaado Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda GHS (GHS Financial Assistance Policy)
IRS Notice 2015-46 iyo 29 CFR §§1.501(r) (4) – (6)
26 CFR 250 (31 Diseembar 2014) p78954-79016
Lifaaqa Dambe 1 Foomka Arjiga Kaalmada Maaliyadda (Financial Assistance Application Form)
Lifaaqa Dambe 2 Jaantuska dhimista ku saleysan dakhliga iyo heerka hantida, iyo qadarka dhimista qofka aan ceymiska lahayn
Lifaaqa Dambe 3 Bixiyeyaasha iyo waaxyada ku jira ceymiska
Lifaaqa Dambe 4 Xisaabta Guud Ahaan La Soo Dallaco (AGB) Boqolkiiba
Lifaaqa Dambe 5 Warqadaha Dadweynaha Helo

## Lagu dabaqi karo

Dhamaan bukaanka Gundersen Lutheran Health System, Inc. (halkaan, wadajir ahaan loo yaqaan sida "GHS") ee adeegyada daryeelka caafimaadka ka qaata Gundersen Lutheran Medican Center, Inc., ama Gundersen Clinic, Ltd.

## Tafaasiisha

Ujeedada Gundersen Health System waa in aan isa soo saarno, anaga oo adeegsano heer sare xagga daryeelka bukaanka, aqoonta, cilmi baarista iyo horumarinta caafimaadka bulshadaha aan u adeegno. Aragtideeda waxay tahay in la xoojiyo caafimaadka iyo fiyoobida bulshadena isla markaasna la kobicyo naf kasta aan taabano, sida bukaanka, qoysaska, iyo shaqaalaha.

Iyadoo u adeegeyso ujeedadaan, GHS waxay ballan qaaday in ay bukaanka siiso adeegyada daryeelka caafimaadka degdegga ee loo baahan yahay iyadoo aan la fiirinin xaaladda ceymiskooda ama awoodda lacag bixinta. Siyaasadaan kaalmada maaliyadda waxaa loogu talogalay in ay u hoggaansanto sharciyada federaalka iyo gobolka lagu dabaqi karo meelaha aan u adeegno. Bukaanka xaqa u yeesha kaalmada hoos timaada siyaasadaan waxay heli doonaan dhimista daryeelka laga qaato bixiyeyaasha GHS la aqoonsan yahay.

Kaalmada maaliyadda la bixiyay sida hoos timaada siyaasadaan waxaa sidaas loo sameyaa lana filaayaa in bukaanka la shaqeyn doonaan hababka arjiga siyaasadda iyo kuwa manaafacaadka u leh dadweynaha

ama barnaamijyada ceymiska laga yaabo in ay bixiyaan kharashka ku baxa daryeelka. GHS ma samayn doonto takoor ku saleysan da', kacsi, isir, caqiido, midab, itaal darri, jihada kacsiga, asal qaran, ama xaaladda socdaalka marka laga gaaro go'aaminta kaalmada maaliyadda.

## Fullinta

### SIFEYNTA

Sifeynta soo socoto waxaa lagu dabaqi karaa dhamaan qeybaha siyaasadaan.

**Xisaabta Guud Ahaan La Soo Dallaco (AGB):** Xisaabta guud ahaan la soo dhallacay waa lacag bixinta la filaayo xagga degdegga ama adeegyada caafimaad looga baahan yahay bukaanka, iyo/ama ballan qaadaha buikaanka. Bukaanka xaqa u yeesha, xisaabtaan kama badan doonto qadarka la xisaabin doono marka la isticmaalo Look Back Method ee ku sharaxan §1.501(r)-5(b) (3) Internal Revenue Service Code. Habka Look Back Method wuxuu ku saleysnaan doonaa sheegashooyinkii la soo dhaafay ay Khidmadda Adeegga Medicare (Medicare Fee-for-Service) siisay Gundersen iyo dhamaan ceymiyeyaasha caafimaadka gaarka ah ee bixiya sheegashooyinka. Sheegashooyinka loo baahan yahay in lagu darro xisaabinta AGB waxay ahaan doonaan sheegashooyinka la ogolaaday sannadka jadwalka la soo dhaafay. Xisaabta lacagaha lagu darro ceymiska, kharashka ceymiska la wadaago iyo lacagaha hore ee la bixiyo waxaa lagu darri doonaa xisaabta kore iyo Medicare Khidmadda Adeegga (Medicare Fee-for-Service) iyo dhamaan sheegashooyinka la ogol yahay ee ka socota ceymiyeyaasha caafimaadka gaarka ah. Dallacaadda guud ee la xariirta sheegashooyinka la soo sheegay waxaa lagu darri doonaa xisaabta hoose. AGB waxaa la xisaabi doonaa sannadkii hal mar marka la gaaro maalinta 45aad ee ku xigta xeritaanka sannadka la soo dhaafay, iyo fullinta maalinta 120aad ee ku xigta xeritaanka sannadka.

**Boqolkiiba Xisaabta Guud Ahaan la soo Dallaco:** Sannad kasta waxaa loo baahan yahay xisaabinta boqolkiiba AGB marka la gaaro maalinta 45aad sannadka, waxaana lagu sharaxay Lifaaqa Dambe 4aad siyaasadaan.

**Muddada Arjiyada:** Muddada la qaban doono arjiyada lagana shaqeyn doono si loo helo kaalmada maaliyadda. Muddada arjiga waxay bilaabataa taariikhda la bixiyay daryeelka iyo waxay dhamaataa maalinta 240aad kaddib marka la soo gudbiyo bayaanka kowaad biilasha ka dambeeyo adeegga.

**Kaalmada Xanaanada Musiibada:** Kaalmada maaliyadda la siiyo bukaanka xaqa u yeesha ee qaba dakhliga sannadka qoyska ka badan 400% Heerka Saboolnimada Federaalka, iyo hantida ka yar 600% Heerka Saboolnimada Federaalka, iyo waajibaadka ka dhasha adeegyada caafimaadka ay GHS bixiso ee ka badan 25% dakhliga qoyska.

**Daryeelka La Dhimay:** Kaalmada maaliyadda ee bixisa dhimista, xagga adeegyada caafimaadka ay GHS ogoshahay, sida ku saleysan dakhliga, lana siiyo bukaanka xaqa u yeesha, ama ballan qaadeyaasha bukaanka, sannadkii dakhliga soo gala u dhexeeyo 200 - 400% Heerka Saboolnimada Federaalka iyo hantida ku sugan ama ka hooseyso lex jeer Heerka Saboolnimada Federaalka.

**Xaaladda Caafimaadka Degdegga:** Sida ku sifeysan Qeybta 1867 ee Social Security Act (Sharciga Soshal Sekuritiga) (42 U.S.C. 1395dd). Macnaha erayga "xaaladda caafimaadka degdegga" waxaa loola jeedaa xaalad caafimaad oo muujisa calaamad darran oo culus (kana mid ah xanuun darran) ilaa heer haddii aan degdeg wax looga qabanin caafimaadka, sida macquulka ah la filan karo in ay dhaliso:

1. In caafimaadka qofka (ama, xagga dumarka xaamilada ah, caafimaadka dumarka ama

cunugeeda aan weli dhallanin) oo la geliyo carqalad culus,
2. Itaal darrida culus ee soo gaarta hawlaha jirka, ama
3. Naafonimada culus ee la xariirta xubin ama qeyb ka tirsan jirka; ama
4. Tan ku saabsan dumarka xaamilada ee qaba jareyska caloosha:
    a. In ay jirto waqti aan ku filneyn oo si ammaanka ku jiro loogu wareejiyo isbitaal kale ka hor inta aysan dhallin, ama
    b. Waxaa dhici karto in wareejintaas ay carqalad ku noqoto caafimaadka ama ammaanka dumarka ama cunugga aan dhallanin.

**Qoyska:** Sida ay ku sifeysay U.S. Census Bureau (Xafiiska Tirokoobka Mareykanka), koox ka kooban labo ama ka badan ee wada daggan iyo qaraabo ah xagga dhallashada, guurka, ama korinta. Haddii bukaanka uu sheegto in uu jiro qof ku tiirsan kuna sheego canshuur celinta dakhliga, sida waafaqsan sharciyada Adeegga Dakhliga Gudaha (Internal Revenue Service), waxaa loo qaadan kaaraa in uu yahay ku-tiirsane xagga go'aanka laga gaaro xaq u yeelashada siyaasadaan.

**Dakhliga Qoyska:** Dakhliga qoyska arjiilaha waa dakhliga guud leysu geeyay ee dhamaan xubnaha qaankaarka qoyska ee ka tirsan reerka kuna jira canshuur celinta federaalka ugu dambeysay. Bukaanka ka yar 18 sanno, dakhliga qoyska waxaa ka mid ah tan waalidka ama waalidiinta iyo/ama waalidka aan dhallin, ama qaraabada xanaaneyso. Dakhliga qoyska waxaa la xisaabaa kadiib marka la isticmaalo sifeynta Census Bureau (Xafiiska Tirokoobka), oo ka mid ah dakhliga soo socda marka la xisaabaayo tilmaamaha saboolnimada federaalka.

1. Waxaa ka mid ah dakhliga, magta shaqo la'aanta, magta shaqaalaha, Soshal Sekuriti, Supplemental Security Income (Dakhliga Kabidda Sekuritiga), kaalmada dadweynaha, lacagaha ciidamada, manaafacaadka qofka soo haray, dakhliga xaqa ama hawlgabnimada, kor saarka, fa'iidada la qeybsado, kirada, hantida la wadaago, dakhliga laga helo hanitda ma guuraanka, ammaanada, mushaarka waxbarashada, taakuleynta xaaska, masaruufka ilmaha.
2. Lama xisaabo manaafacaadka aan ahayn lacagta caddaanka (sida boonada raashinka iyo kabidda guriyeynta).
3. Xisaabinta ku saleysan canshuurta ka hore;
4. Waxay ka saartaa fa'iidada maaliyadda ama khasaarada

**Heerka Saboolnimada Federaalka:** Heerka Saboolnimada Federaalka (Federal Poverty Level) (FPL) waxay isticmaashaa heerarka isbaddala xagga tirada qoyska iyo inta ay ka kooban tahay si loo ogaado qofka saboolka ah waddanka Mareykanka. Muddo ka muddo, Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha Mareykanka (United States Department of Health and Human Services) waxay casriyeysaa Diiwaanka Federaalka (Federal Register) sida hoos timaada awoodda ay ka haysato qeybta hoose (2), Section 9902 Title 42 ee United States Code. Tilmaamaha FPL ee iminka jira waxaa laga tixraaci karaa http://aspe.hhs.gov/POVERTY/.

**Kaalmada Maaliyadda:** Kaalmada la siiyo bukaanka xaq u yeesha, oo la kulma dhibaatada maaliyadda, si looga qaado dhamaan ama qeyb ka tirsan waajibaadka maaliyadda saaran xagga degdegga ama daryeelka caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah ee GHS bixiso.

**Daryeelka Lacag La'aanta:** Ka dhaafidda 100% waajibaadka maaliyadda saaran bukaanka xagga adeegyada caafimaadka xaqa loo leeyahay ay bixiso GHS xagga bukaanka xaqa u leh, ama ballan qaadeyaashooda, sannadkii dakhliga qoyska soo gala ama ka yar 200% FPL iyo hantid ka yar 600% FPL.

**Ballan Qaadaha:** Qofka aan ahayn bukaanka oo mas'uul ka ah lacag bixinta biilka bukaanka.

**Dallacaadda Guud:** Dallacaadda guud ee lagu sameeyo qadarja buuxa ee loo dajiyay bixinta adeegyada daryeelka bukaanka ka hor inta aan dhimista laga goynin dakhliga.

**Guri Laawaha:** Sida dawladda Federaalka u sifeysay, kaddibna HUD ku soo daabacday Federal Register (Diiiwaanka Federaalka) bishii Diseembar 5, 2011: Qofka ama qoyska aan lahayn guri daggan, joogto ah oo ku filan, macnaha qofka ama qoyska qaba guri uu daggan yahay oo ah meel dadweyne ama gaar ah ama aan loogu talogelin in uu dago qof aadane ah ama ku nool hooy dadweyne ama gaar looga shaqeeyo, loona sameyay in uu siiyo qorshaha nolosha ku meel gaarka ah. Qeybtaan waxaa kaloo ku jira shakhsiyaad ka baxa hay'ad halkaas uu isaga ama iyada daggan tahay muddo 90 maalin ama ka yar ee dagganaa hooyga degdegga ama goob aan loogu talogelin in aadanaha dhakhso u daggo ka hor inta aan la soo gelin hay'adda.

**Caafimnaad Ahaan Loo Baahan Yahay:** Sida Medicare ku sifeysay in ay yahiin adeegyo ama waxyaabo macquul iyo lagama maarmaan ah xagga baarista ama daweynta cudurka ama dhaawaca.

**Khidmadda Medicare ee Loogu Talogalay Adeegga (Medicare Fee-For-Service) (FFS):** Ceymiska caafimaadka la heli karo sida hoos timaado Medicare Qeybta A iyo Qeybta B ee Title XVIII ee Social Security Act (Sharciga Soshal Sekuritiga) (42 USC 1395c – 1395w-5).

**Qorshaha Lacag Bixinta** Qorshaha lacag bixinta ay ku heshiyaan GHS iyo bukaanka labadaba, ama ballan qaadaha bukaanka, xagga khidmaha laga bixiyo jeebka. Qorshaha lacag bixinta wuxuu xisaabta ku darri doonaa daruufaha maaliyadda bukaanka, xisaabta laga rabo, iyo lacag bixintii la soo dhaafay.

**Xaq u Yeelashada Horay Loo Aqoonsado:** Sida hoos timaado xaaladaha qaar, bukaanka aan ceymiska qabin waxaa loo qaadan doonaa ama loo haystaa in ay xaq u leeyahiin kaalmada maaliyadda taasoo ku saleysan diiwaan gelintooda barnaamijyada kale ee lagu baaro hababka ama ilo kale oo laga helo macluumaad, uusan si toos ah u bixinin bukaanka, in qiimeyn lagu sameeyo baahida maaliyadda qofka.

**Ceymiyaha Caafimaadka Gaarka:** Urur kasta aan ahayn mid ka tirsan dawladda ee bixiya ceymiska caafimaadka, kana mid ah ururada aan ahayn dawlad ee maamula qorshaha ceymiska caafimaadka sida hoos timaada Medicare Advantage.

**Muddada Aqoonta:** Arjiileyaasha loo aqoonsado xaq u yeelashada kaalmada maaliyadda waxaa la siin doonaa kaalmo muddo lex bil. Kaalmada waxaa kaloo laga soo bilaabi doonaa gadaal si loogu dabaqo dhamaan xisaabaadka xaqa u yeesha ee loo galo adeegyada la qaato lex bil ka hor taariikhda arjiga.

**Dhimista Ceymis Laawaha:** Sida hoos timaada siyaasadaan, GHS waxay bukaanka aan qabin ceymiska dhinaca saddaxaad siin doontaa dhimista la siiyo qofka aan ceymiska qabin, xagga adeegyada xaqa loo yeesho, waqitga la gudbiyo dallacaadda aan la dhimin.

**Bukaanka Ceymis Laawaha:** Bukaanka aan lahayn ceymiska dhinaca saddaxaad ee laga qaato ceymiyaha ganacsiga dhinaca saddaxaad, qorshaha ERISA, Federal Health Care Program (Barnaamijka Daryeelka Caafimaadka Federaalka) (kana mid ah Medicare, Medicaid, SCHIP, iyo CHAMPUS aan la soo koobin),

Worker's Compensation (Magta Shaqaalaha), ama kaalmada dhinac saddaxaad ee la heli karo si loo bixiyo kharashka ku baxa daryeelka caafimaadka bukaanka.

**Bukaanka Ceymiska Liita:** Qofka qaba ceymiska gaarka ama ceymiska dadweynaha, kaasoo maaliyad ahaan ku adkaan doonto in uu si buuxdo u bixiyo kharashka jeebka laga bixiyo ee la filaayo xagga adeegyada caafimaadka ay GHS bixiso.

## ADEEGYADA XAQA LOO YEESHO

Adeegyada xaqa loo yeesho ee hoos yimaada siyaasadda kaalmada maaliyadda GHS waa in ay kliiniko ahaan yahiin kuwo ku habboon iyo waafaqsan heerarka caafimaadka la ogol yahay. Waxaa ka mid ah kuwa soo socda:

1. Adeegyada caafimaadka degdegga la bixiyo marka xaaladda degdeg tgahay, iyo sidoo kale daryeelka la bixiyo marka xaaladda tahay degdeg, ujeedadana tahay in la dajiyo xaaladda bukaaanka.
2. Adeegyada aan la dooranin lana bixiyo marka laga jawaabo xaaladaha nafta cabsi geliya sida xaaladaha degdegga.
3. Adeegyada caafimaadka loo baahan yahay, sida adeegyada daryeelka caafimaadka bukaan jiifka ama bukaan socodka si loo qiimeeyo, loo baaro, iyo/ama loo daweeyo dhaawaca ama cudurka, iyo sidoo kale adeegyada caadi ahaan sifeyso Medicare ama ceymis kale ku sifeeyo "waxyaabaha ama adeegyada ku jira ceymiska."
4. Brograamka daweynta ku tiirsanaanta kiimikada Unity House ee loogu talogalay qaangaarka marka maxkamadda aysan amrin adeegyada ama aysan maal gelinin Dagmada.
5. Adeegyada bixiyeyaasha u shaqeeya GHS waxaa looga hadlaa siyaasadaan. Fadlan fiiri Lifaaqa Dambe saddaxaad si aad u heshid liiska bixiyeyaasha lagu soo darray.

Adeegyada aan xaqa u yeelanin kaalmada maaliyadda waxaa ka mid ah kuwa soo socda:

1. Hababka la doorto, aan caafimaad ahaan ahayn lagama maarmaan, iyo adeegyada aysan caadi ahayn bixinin Medicare, ama sida Medicare u sifeyso ama sida ceymis kale u sifeeyo in aysan caafimaad ahaan ahayn wax loo baahan yahay.
2. Qaliinka Lasik, Daryeelka Chiropractic, Adeegyada Bacriminta, Contacts/Muraayadaha, Qaliinka Qurxinta/Adeegyada Blaastiigga, Qalabka Kaalmada Maqalka, Hawlaha Ilkaha, Adeegyada Ilkaha, Cabbirka Aragga.
3. Adeegyada laga qaato bixiyeyaasha daryeelka aan u shaqeynin GHS (tusaale ahaan kuwa gaarka ah iyo/ama caafimaadka GHS ama takhaatiirta aqoonyaanka, gaadiidka ambulansada, iwm.) Bukaanka waxaa lagu dhiiri gelinaa in ay si toos ah ula xariiraan bixiyeyaashaan si ay u weydiiyaan kaalmada la heli karo una sameyaan qorshaha lacag bixinta. Fiiri Lifaaqa Dambe 3 si aad u heshid liiska bixiyeyaaha aan ku jirin siyaasadaan.
4. Lacagaha horta la bixiyo (deductibles) iyo qeybta laga bixiyo ceymiska (coinsurance) lana xariira adeegyada caafimaadka loo baahan yahay ee la siiyo bukaanka dibadda ka ah shabakada sida ay ku sifeyaan ceymiskooda.

## ISKU DUWIDDA QIIMEYNTA BAAHIDA CAAFIMAADKA BULSHADA

Xaafadda GHS u adeegto, waxaa laga fulliyay qiimeynta baahida caafimaadka bulshada (CHNA). Caafimaadka madaxa iyo ku xadgudubka mukhaadaraadka waxaa lagu tilmaamay in ay yahiin arrimo waaweyn oo la xariira caafimaadka. Cayilka waxaa loo aqoonsaday in ay tahay arrin caafimaad jirta. Qorshaha fullinta caafimaadka bulshada waxay aqoonsan tahay daweynta ku xadgudubka

mukhaadaraadka sida mid ka mid ah faragelinta caafimaadka la xariira caafimaadka madaxa, hase ahatee bacdamaa daweynta ku xadgudubka mukhaadaraadka waxaa lagu tilmaamaa adeeg la doorto mana loogga hadlo sifeynta adeegyada xaqa loo leeyahay xagga kaalmada maaliyadda ama dhimista qofka bixiyo. Baaxadda daweynta ku xadgudubka mukhaadaraadka waxay sidaas darteed xaq u yeelan doonaan kaalmada maaliyadda, iyo waxay hoos imaan doonaan soo koobidda AGB xagga kaalmada maaliyadda ay xaqa u leeyahayiin bukiaanka ama ballan qaadeyaasha GHS.

**SHARDIGA XAQ U YEELASHADA**

Kaalmada maaliyadda waxaa loo fidin doonaa bukaanka aan ceymiska lahayn iyo kuwa ceymiska liito, ama ballan qaadaha bukaanka, ee la kulma sharuudo gaar ah, sida ku sifeysan hoos. Sharuudahaan waxay hubin doonaan in siyaasadaan kaalmada maaliyadda si siman looga dhaqan geliyo GHS. GHS waxay reebaneysaa xaqa ay u leedahay in ay dib u baddasho, wax ka baddasho ama baddasho siyaasadaan hadba sida loogu baahdo ama sida ku habboon.

Ilaha lacag bixinta (ceymiska laga helo shaqada, Kaalmada Caafimaadka, Maaliyadda la Siiyo Saboolka, Dhibaneyaasha Dambiyada Dagaalka, iwm.) waa in la fiiriyo lana qiimeeyo ka hor inta aan la tixgelinin kaalmada maaliyadda si loo hubsado in ilaha GHS si taxadir leh loo maamulo xagga kaalmada maaliyadda. Haddii bukaanka u muuqdo in uu xaq u leeyahay kaalmo kale, GHS waxay bukaanka u diri doontaa wakaaladda ku habboon si loo siiyo kaalmo xagga dhamaystirka arjiyada iyo foomamka loo baahan yahay. Arjiileyaasha kaalmada waxaa laga rabaa in ay fiiriyaan dhamaan fursadaha lacag bixinta kale, taasoo ku xeran ogolaashada kaalmada maaliyadda.

Arjiileyaasha kaalmada maaliyadda waxay mas'uul ka yahiin in ay barnaamijyada ka dalbadaan iyo daba galaan ceymiska caafimaadka gaarka ah. Bukaanka, ama ballan qaadeyaasha bukaanka, ee doorta in aysan la shaqeynin dalabka barnaamijyada ay aqoonsatay GHS sida in ay yahiin ilaha suurtogalka ah lacag bixinta daryeelka, waxaa dhici karto in loo diido kaalmada maaliyadda. Arjiileyaasha waxaa laga filaa in ay wax ku daraan kharashka ku baxa daryeelkooda sida ku saleysan awoodda ay u leeyahiin in ay bixiyaan, sida ku qoran siyaasadaan.

Bukaanka, ama ballan qaadeyaasha bukaanka, lagu tilmaamay in ay u badan tahay in ay xaq u yeeshaan Medicaid, waa in ay dalbadaan ceymiska Medicaid ama keenaan diidmada Medicaid taasoo la helay lexdii (6) bilood ee la soo dhaafay gudahooda laga bilaabo marka la dalbaday kaalmada maaliyadda GHS. Bukaanka, ama ballan qaadeyaasha bukaanka, waa in ay la shaqeyaan habka arjiga ku qoran siyaasadaan si ay u helaan kaalmada maaliyadda.

Habka loo baahan yahay in GHS tixgeliso marka ay qiimeyneysoo xaq u yeelashada bukaanka si loo helo kaalmada maaliyadda waxaa ka mid ah dakhliga qoyska, hantida, iyo waajibaadka caafimaadka. Barnaamijka kaalmada maaliyadda GHS waxaa heli kara dhamaan bukaanka la kulma xaq u yeelashada sharuudaha ku jira siyaasadaan, iyadoo aan la fiirinin goobta joqraafiyada ama xaaladda guriga. Kaalmada maaliyadda waxaa loo fidin doonaa bukaanka, ama ballan qaadaha bukaanka, taasoo ku saleysan baahida maaliyadda iyo sida u hoggaansan sharciyada federaalka iyo gobolka.

Kaalmada maaliyadda waxaa la siiyaa bukaanka xaqa u yeesha ee ceymiska liita, halkaas oo bixinta kaalmadaas waafaaqsan tahay heshiiska ceymiyaha. Caadi ahaan, lama heli karo kalmada maaliyadda la siiyo lacagaha bukaanka ku darro ama baaqiga ka dambeeyo ceymiska haddii uu bukaanka ku guul daryesto in uu u hoggaansamo sharuudaha ceymiska sida helitaanka tixraacyada habboon ama

ogolaashada. Guud ahaan, waxaa dhici karto in lacagaha dibadda ka ah shabakada loo fiiriyo hadba sida kiiska yahay. Bukaanka qaba xisaabaadka caafimaadka shakhsiga, ee ka fa'iideysta canshuurta, sida Health Savings Account (Xisaabta Keydka Caafimaadka), Health Reimbursement Arrangement (Qorshaha Lacag Celinta Caafimaadka) ama Flexible Spending Account (Xisaabta Kharashka Dabacsan), waxaa laga filaa in ay isticmaalaan maaliyadda xisaabta ka hor inta aan la siinin kaalmada maaliyadda.
GHS waxay reebaneysaa xaqa ay u leedahay in ay ka noqoto dhimista lagu sharaxay halkaan haddii sida macquulka ay go'aan ku gaarto in sharuudaha noocaas jebiyaan waajibaadka sharciga ama heshiiska GHS.

**KAALMADA MAALIYADDA**
Sida ku saleysan qiimeynta dhakhliga qoyska arjiilaha, hantida, iyo waajibaadka ka saaran caafimaadka, arjiileyaasha xaqa u yeesha waxay qaadan karaan kaalamada soo socoto.

**Dhimista Ceymis Laawaha:** Bukaanka aan qabin ceymiska dhinaca saddaxaad waxaa la siin doonaa dhimista ceymis la''aanta waqtiga la bixiyo dallacaadda aan la dhimin. Tani waxaa lagu dabaqaa bukaanka aan ceymis la bixiyo ka haysanin ceymiska daryeelka caafimaadka iyo/ama ka haysanin bixiyeyaal saddaxaad.

Bukaanka, ama ballan qaadeyaasha bukaanka, kaddib marka la siiyo dhimista qofka aan ceymiska qabin, halkaan, lagama reebin in ay soo dalbadaan iyo in ay xaq u yeeshaan kaalmada maaliyadda dheeraadka ah.

**Daryeelka Buuxa ee Lacag La'aanta ah:** Xisaabta buuxda dallacaadda Gundersen Lutheran Medical Center waxaa la garan doonaa in looga hadlay siyaasadaan kaalmada maaliyadda bukaanka aan ceymiska lahayn ama haysta ceymiska liita, ama ballan qaadaha bukaanka, ee dakhliga guud qoyskiisa ku sugan yahay ama ka yar yahay 200% heerka saboolnimada federaalka iminka jira iyo hantida la'eg 600% heerka FPL.

**Daryeelka La Dhimay:** Dallacaadda GHS ee la xariirta adeegyada la bixiyo sida hoos timaada siyaasadda kaalmada maaliyadda waxaa lagu dabaqi doonaa dhimista dakhliga bukaanka aan ceymiska ku jirin ama qaba ceymis liita, ama ballan qaadaha bukaanka, marka dakhliga guud ee qoyska ka badan yahay 200% balse ka yar yahay ama la'eg yahay 400% heerka saboolnimada federaalka iminka jira iyo hanti ka yar 600% FPL.  Waxaa la bixin doonaa dhimis, sida waafaqsan jadwalka soo socda, kuna saleysan dakhliga qoyska ee bukaanka, ama ballan qaadaha bukaanka:

1. Dakhliga qoyska ee ka koreeyo 200% FPL balse la'eg ama ka yar 225% FPL waxay xaq u leeyahiin in ay helaan dhimista 70% baaqiga laga rabo bukaanka.
2. Dakhliga qoyska ee ka koreeyo 225% FPL balse la'eg ama ka yar 250% FPL waxay xaq u leeyahiin in ay helaan dhimista 60% baaqiga laga rabo bukaanka.
3. Dakhliga qoyska ee ka koreeyo 250% FPL balse la'eg ama ka yar 275% FPL waxay xaq u leeyahiin in ay helaan dhimista 40% baaqiga laga rabo bukaanka.
4. Dakhliga qoyska ee ka koreeyo 275% FPL balse la'eg ama ka yar 400% FPL waxay xaq u leeyahiin in ay helaan dhimista 15% baaqiga laga rabo bukaanka.

**Daryeelka Musiibada:** Bukaanka GHS aan la kulmin heerka xaq u yeelashada kaalmada maaliyadda waxay xaq u yeelan karaan kaalmo sida hoos timaada sharuudaha, marka biilasha caafimaadka GHS dhalliso dhibaata darran xagga maaliyadda. Bukaanka, ama ballan qaadeyaashooda, waxay xaq u yeelan

karaan kaalmada daryeelka musiibada haddii ay jeebkooda ka bixiyeen waajibaadka kharashka ka dhasha adeegyada caafimaadka ay GHS bixiso kana badan 25% dakhliga qoyska iyo leeyahay hanti ka hooseyso 600% heerka FPL.

Bukaanka, ama ballan qaadeyaasha bukaanka, ee la kulma xaq u yeelashada daryeelka musiibada waxaa laga dhimi doonaa dallacaadda GHS ilaa xisaabta aysan ka badanin 25% dakhliga qoyska.

**Qorshooyinka Lacag Bixinta:** Waxaa la filan doonaa lacag bixin buuxda, xagga baaqiga haray, muddo 21 maalin laga bilaabo bayaanka hore bukaanka. Haddii aysan suurtogal u ahayn bukaanka, ama ballan qaadaha, in uu si buuxda u bixiyo muddadaan, waxaa dhici karto in la fidiyo qorshaha lacag bixinta ilaa muddo labo sanno xagga baaqi kasta oo hara kaddib marka bukaanka la siiyo dhimista kaalmada maaliyadda. Qorsho lacag bixin macquul ah ayaa laga dhex samayn doonaa GHS iyo bukaanka. Muddada qorshaha lacag bixinta waxay ku saleysnaan doontaa biilasha caafimaadka lagu leeyahay bukaanka, dakhliga qoyska iyo xaaladaha kale ee qafiifiya. Haddii la ogolaado, qorshaha wuxuu ahaan doonaa mid ka madax banaan kor saar.

Bukaanka waxay mas'uul ka yahiin in ay la xariiraan GHS mar kasta oo la fullin waayo qorshaha lacag bixinta lagu heshiyay. Xariirin la'aanta bukaanka waxay dhallin kartaa in xisaabta lagu wareejiyo wakaaladda aruurinta.

## XAQ U YEELASHADA HORAY LOO AQOONSADO

GHS waxay fahamsan tahay in dhamaan bukaanka aysan awood u lahayn in ay dhamaystiraan arjiga kaalmada maaliyadda ama in ay u hoggaansamaan codsiyada warqadaha. Waxaa jiri kara xaalado hoos yimaad marka bukaanka xaq u yeesho kaalmada maaliyadda isaga oo aan dhamaysanin arjiga kaalmada maaliyadda aan rasmiga ahayn. Waxaa dhici karto in GHS isticmaasho macluumaad kale si ay u xisaabto haddii xisaabta bukaanka aan la soo aruurin karin kaddibna macluumaadkaan waxaa loo adeegsan doonaa in lagu ogaado xaq u yeelashada Medicaid.

Xaq u yeelashada horay loo aqoonsado waxaa la siin doonaa bukaanka sida ku saleysan xaq u yeelashadooda barnaamijyada kale ama xaaladaha nolosha sida:

1. Bukaanka ama ballan qaadeyaasha ee ku dhawaaqay khasaaro. Kiisaska ku lugta leh khasaarada, waxaa laga dhaafi doonaa oo keliya baaqiga xisaabta laga bilaabo taariikhda deynta khasaarada laga masaamaxo.
2. Bukaanka ama ballan qaadeyaasha dhinta aan dardaaran ka reebin hantida maguuraanka.
3. Bukaanka ama ballan qaadeyaasha loo aqoonsado in ay yahiin guri laaweyaal.
4. Xisaabaadka ay soo celiso wakaaladda aruurinta laguna tilmaamo xisaab aan la soo aruurin karin, taasoo ugu wacan asbaabta kore.
5. Bukaanka ama ballan qaadeyaasha xaqa u yeesha barnaamijka Medicaid ee Gobolka, waxay xaq u yeelan doonaan kaalmada waajibaadka qeybsiga kharashka ee la xariira barnaamijka ama adeegyada aan ku jirin ceymiska.

GHS waxay fahamsan tahay in bukaanka qaar aysan ka jawaabin habka arjiga GHS. Sida hoos timaada xaaladahaan, GHS waxay isticmaali kartaa ilo kale oo macluumaad ah si ay qiimeyn ugu samayso baahida maaliyadda qofka. Macluumaadkaan waxay GHS u suurtogelin doontaa in ay gaarto go'aan xogogaal ah oo ku saabsan baahida maaliyadda bukaanka aan soo jawaabin, iyada oo isticmaasha qiyaasta ugu fiican ee la heli karo marka aan la haynin macluumaadka sida toosan u bixiyay bukaanka.

GHS waxay adeegsan kartaa dhinac saddaxaad si ay u fulliso fiirinta elataroonigga macluumaadka bukaanka si loo qiimeeyo baahida maaliyadda. Fiirintaan waxay adeegsataa warshadaha daryeelka caafimaadka - modelka daryeelka caafimaadka ee ku saleysan xogta diwaanka dadweynaha. Modelkaan saadaalinta waxaa ku jira xogta diiwaanka dadweynaha si loo xisaabo buundada awoodda maaliyadda iyo bulsho-dhaqaalaha ee laga helo qiyaasta dakhliga, hantida iyo lacagta caddaanka.

Farsamada elataroonigga waxaa loo sameyay in lagu qiimeeyo bukaan kasta ilaa heer isla mid ah, waxaana lagu diyaariyay ogolaashada taariikhda kaalmada maaliyadda GHS sida hoos timaada habka arjigii hore.

Farsamada elataroonigga, marka la isticmaalo, waxaa la adeegsan doonaa ka hor inta aan lagu tilmaamin deynta xun kaddib marka laga daalo dhamaan ilaha kale ee la xariira xaq u yeelashada iyo lacag bixinta. Tani waxay GHS u ogolaataa in ay baaritaan hore ku samayso dhamaan bukaanka xagga kaalmada maaliyadda ka hor inta aysan ku dhaqaaqin aruurinta aan caadiga ahayn. Xogta ka soo noqota fiirintaan xaq u yeelashada waxay ahaan doontaa warqado ku filan baahida maaliyadda hoos timaada siyaasadaan.

Marka diiwaan gelinta elataroonigga loo adeegsado sida aasaaska xaq u yeelashada Medicaid, heerarka dhimista ugu sareyso waxaa la siin doonaa adeegyada xaqa loo leeyahay adeegga taariikh ahaan lasoo dhaafay keliya. Haddii bukaanka uusan xaq u lahayn sida hoos timaada habka ku qoridda elataroonigga, bukaanka waxaa weli loo tixgelin doonaa sida hoos timaada habka arjiga kaalmada maaliyadda hore. GHS waxay bukaanka aan xaq u yeelanin kaalmada maaliyadda habkaan siin doontaa ogeysiis qoran oo ogeysiiya in la heli karo kaalmada maaliyadda. Ogeysiiskaan waxaa ka mid ah soo koobid ku qoran luqad la fahmi karo oo ku saabsan siyaasadda kaalmada maaliyadda iyo talaabadaha loo baahan yahay in la qaado haddii aan la gudbinin arjiga ama la bixinin baaqiga haray.

Xisaabaadka bukaanka horay loo aqoonsaday xaq u yeelashada Medicaid waxaa dib loo sifeyn doonaa mar kale sida hoos timaado siyaasadda kaalmada maaliyadda. Looma diri doono aruurin, laguma qasbi doono talaabo aruurin dheeraad ah, looma diri doono ogeysiis qoran oo ku saabsan aqoonsigooda xaq u yeelashada elataroonigga, mana lagu darri doono kharashka deynta xun ee isbitaalka.

## ADEEGYADA CAAFIMAADKA DEGDEGGA

Sida waafaqsan nidaamka SHARCIGA DAWEYNTA DEGDEGGA CAAFIMAADKA IYO SHAQAALAHA FEDERAALKA (FEDERAL EMERGENCY MEDICAL TREATMENT AND LABOR ACT) (EMTALA), ma jiro bukaan la baari doono xagga kaalmada maaliyadda ama macluumaadka lacag bixinta ka hor inta aan la bixinin adeegyada xaaladaha degdegga. GHS waxay codsan kartaa in lacag bixinta bukaanka lala qeybsado (macnaha lacagaha lagu darro) la sameeyo waqtiga adeegga, hase ahatee codsiyada noocaas sabab uma aha dib u dhac ku yimaada baarista caafimaadka ama daryeelka dajinta loo baahan yahay ee la xariirta xaaladda caafimaadka degdegga oo la tilmaamay (Fiiri Siyaasadda GL-3001).

## XISAABAADKA LAGU SOO DALLACO BUKAANKA XAQA U YEESHA KAALMADA MAALIYADDA

Guud ahaan, xisaabta la soo dallaco waa lacag bixinta laga filaayo bukaanka, ama ballan qaadaha bukaanka, ee xaqa u yeesha kaalmada maaliyadda. Bukaaanka xaqa u yeesha ee aan lahayn ceymis, xisaabtaan kama badan doonto qadarka la xisaabin doono marka la isticmaalo Look Back Method.

Habka Look Back Method wuxuu ku saleysnaan doonaa xisaabta hoos timaada Medicare-Khidmadda-Adeegyada (Medicare Fee-For-Services) iyo dhamaan ceymiyeyaasha caafimaadka gaarka ah ee sheegashooyinka siiya GHS. Sheegashooyinka loo baahan yahay in lagu darro xisaabinta AGB waxay ahaan doonaan sheegashooyinka la ogolaaday sannadka jadwalka la soo dhaafay. Xisaabta wada-ceymiska (co-insurance), lacagaha-lagu-darro (co-payments) iyo lacagaha horta la bixiyo (deductible) waxaa lagu darri doonaa xisaabta kore waxaana la raacin doonaa khidmadda-adeegga Medicare iyo dhamaan sheegashooyinka la ogol yahay ee laga qaato ceymisyada caafimaadka gaarka ah ee bixiya sheegashooyinka. Dallacaadda guud ee la xariirta sheegashooyinka la soo sheegay waxaa lagu darri doonaa xisaabta hoose. AGB waxaa la xisaabin doonaa sannadkii. Xisaabaadka boqolkiiba waxaa la adeegsan doonaa maalinta 120aad kaddib marka la gaaro dhamaadka jadwalka sannadka ay GHS isticmaasho si ay u xisaabto boqolkiiba AGB.

Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan boqolkiiba AGB, fadlan la xariir xafiiska Customer Financial Services (Adeegyada Maaliyadda Macaamilka), ee laga helo (608) 775-8660 ama (800) 362-9567, khadka. 58660. Ma jiro khidmad lagu soo dallaco bixinta macluumaadka ku saabsan AGB.

Bukaanka loo garto in ay xaq u leeyahiin kaalmada maaliyadda lagama filaayo in ay bixiyaan khidmadaha guud ee laga bixiyo adeegyada xaqa loo yeesho inta ay hoos yimaadaan siyaasadda kaalmada maaliyadda GHS.

## DALABKA KAALMADA MAALIYADDA

Xaq u yeelashada kaalmada maaliyadda waxay ku saleysnaan doontaa baahida maaliyadda waqtiga arjiga. Guud ahaan, waxaa loo baahan yahay warqado si loo taageero arjiga kaalmada maaliyadda. Haddii aan la bixinin warqado ku filan, GHS waxay raadsan kartaa macluumaad dheeraad ah.

Waxaa loo baahan yahay caddeyn leysku halleyn karo si loo taageero baahida loo qabo kaalmada maaliyadda.

Warqadaha dakhliga soo socoda waxaa laga rabaa bukaanka, ama ballan qaadeyaasha, si go'aan looga gaaro xaq u yeelashada.

1. Koobiga canshuur celinta Federaalka, iyo dhamaan Jadwalada (Schedules) ku lifaaqan, laga bilaabo sannadka canshuurta ugu dambeyay
2. Caddeynta Dakhliga Iminka Jira (koobiga dabada jeegaggii ugu dambeyay ama warqado kale).
3. Caddeynta dakhli kale, sida shaqo la'aanta, magta shaqaalaha, taakuleynta xaaska (alimony), dakhliga ammaanada (trust income), manaafacaadka ciidanka (veterans benefits)
4. Bayaanada Bangiga Iminka Jira

Warqadaha hantida soo socdo ayaa laga rabaa bukaanka, ama ballan qaadeyaashooda, si go'aan looga gaaro xaq u yeelashada:

1. Xisaabaatka Wareega
2. Xisaabta keydka
3. Xisaabaadka suuqa lacagta
4. Shahaadooyinka ku shubidda
5. Fa'iidada la qeybsado sannadka
6. Xisaabaadka maalgelinta aan hawlgabnimada ahayn
7. Xisaabaadka hawlgabnimada, sida xaqa

8. Hantida Maguuraanka
9. Wax kale

Arjiyada kaalmada maaliyadda waxaa la gudbin karaa ilaa 240 maalin kaddib taariikhda ka dambeyso oraahda kowaad ee laga masaamaxo deynta khasaarada.

Haddii arjiga aan la dhamaystirin, ama uu jiro codsi in la helo macluumaad dheeraad ah, arjiga wuxuu ahaan doonaa mid shaqeeya muddo 30 maalin laga bilaabo taariikhda warqadda loo diray arjiilaha soo codsaday macluumaadkaan. Haddii arjiilaha uusan ka soo jawaabin muddo 30 maalin gudahooda, waa la soo diidi doonaa arjiga.

Muddada la fiiriyo Financial Assistance Application (Arjiga Kaalmada Maaliyadda) (FAA) ee sida buuxdo loo dhamaystiro, waxaa la joojin doonaa ilaa muddo dhamaan dacwadaha soo aruurinta. FAA waxaa laga reebi doonaa qoraal la geliyo diiwaanka bukaanka ama waxaa la marrin doonaa skaan kaddibna waa la qori doonaa. Waa sii socon doontaa habka biilasha caadiga inta FAA laga fiirinaayo lagana tixgelinaayo FAA. Haddii wakiilka ku habboon ee GHS ogolaado FAA dhamaystiran, oo waafaqsan, tani waxaa lagu caddeyn doonaa faylka bukaanka kaddibna baaqiga xisaabta waa la caffin doonaa sida waafaqsan koodka ku habboon. Arjiyada kaalmada maaliyadda waa in loo gudbiyo xafiiska soo socda:

Gundersen Health System
Customer Financial Service; Mailstop NCA3-01
1900 South Avenue
La Crosse, WI 54601
(608)775-8660 ama (800) 362-9567, khadka 58660

Haddii loo diido kaalmada maaliyadda, bukaanka ama ballan qaadaha bukaanka, waxay dib u dalban karaan marka dakhliga ama xaaladda isbaddasho.

## GO'AAMINTA XAQ U YEELASHADA, RACFAANADA IYO XALLINTA QILAAFAADKA

Bukaanka waxaa qoraal lagu ogeysiin doonaa FAA muddo soddon (30) maalin gudahooda laga bilaabo marka ay soo gudbiyeen arji dhamaystiran. Arjiilaha loo arko in uu xaq u leeyahay kaalmada maaliyadda waxaa la siin doonaa lacagaha dib u bixinta ka badan lacagaha la xisaabo ee uu qabo bukaanka ama ballan qaadaha xagga xisaabaadka la siiyay kaalmada sida hoos timaada siyaasadda kaalmada maaliyadda GHS. Lacag celinta waxaa lagu dabaqaa lacag bixinta $15 ama ka badan. Sida waafaqsan siyaasadaan, guud ahaan kaalmada maaliyadda looma fidiyo lacagaha lagu darro ama baaqiga ceymiska kaddib marka bukaanka ku guul dareysto in uu helo tixraac habboon ama ogolaasho, ama haddii kaalmada noocaas aysan waafaqsaneyn heshiiska ceymiska, sidaas darteed lacagaha noocaas ee la qabtay dib looma soo celin doono.

Bukaanka waxay qoraal ahaan racfaan ka qaaadan karaan go'aankaan muddo 30 maalin laga bilaabo marka ay helaan ogeysiiska:

Gundersen Health System
Attn: Customer Financial Service Manager
1900 South Avenue
La Crosse, WI 54601

Racfaanada waa in lagu soo gudbiyo muddo 30 maalin gudahooda laga bilaabo taariikhda go'aanka

asalka. Agaasimaha Fulinta Wareegga Dakhliga (Revenue Cycle) wuxuu fiirin doonaa racfaanka si uu u siiyo tixgelin dheeraad ah. Go'aanada Agaasimaha Fullinta Wareegga Dakhliga (Executive Director of Revenue Cycle) waxat agaab doonaan kama dambays.

## MUDDADA AQOONTA

Haddii arjiilaha loo garto in uu xaq u leeyahay kaalmo, GHS waxay siin doontaa kaalmada maaliyadda muddo lex bil. Kaalmada maaliyadda waxaa kaloo laga soo bilaabi doonaa gadaal, dhamaan biilasha aan la bixinin ee xisaabaadka xaqa u leh ee la xariira adeegyada la qaatay lex bil ka hor inta aan la soo gudbinin arjiga. Ma jiro bukaan loo diidi doono kaalmada ku saleysan bixin la'aanta macluumaadka ama warqadaha aan loo baahneyn arjigaan.

## OGEYSIISKA KAALMADA MAALIYADDA

Macluumaadka ku saabsan siyaasadda kaalmada maaliyadda GHS iyo tilmaamaha ku saabsan sida loola xariiro kaalmada GHS iyo macluumaadka dheeraadka ah, iyo macluumaadka ku saabsan fursadaha lacag bixinta, waxaa lagu soo dhajin doonaa diiwaan gelinta isbitaalka iyo kliinikada iyo goobaha jiifinta, iyo waaxda degdegga isbitaalka. Macluumaadkaan waxaa kaloo laga heli karaa la-talliyeyaasha maaliyadda ururka.

Siyaasadda kaalmada maaliyadda GHS, arjiga iyo soo koobidda ku qoran luqada fudud ee ku saabsan siyaasadda waxaa laga heli doonaa bogga internetka siistemka www.gundersenhealth.org/FAA. Waxaa kaloo la heli karaa macluumaadkaan, lacag la'aan, kaddib marka aad la xariirtid (608) 775-7780 ama (800) 362-9567, khadka. 57780. Haddii aad u baahan tahay kaalmo ku saabsan sida loo dhamaystiro arjiga kaalmada maaliyadda, waxaad wici kartaa (608) 775-7780 ama (800) 362-9567, khadka 57780 si loola hadlo la-talliyaha maaliyadda.

Macluumaadka ku jira siyaasadda kaalmada maaliyadda GHS waxaa bukaanka lagu gaarsiin doonaa luqad hiddo ahaan ku habboon. Macluumaadka ku saabsan kaalmada maaliyadda, iyo ogeysiiska lagu soo dhajiyay isbitaalka iyo goobaha kliinikada waa la tarjumi doonaa, waxaana lagu tarjumi doonaa luqad ah luqadda aasaasiyan ay ku hadlaan 1,000 ama 5% dadka daggan meesha adeegga ka jiro.

Intaas kaddib, GHS waxaa ku jira tixraacinta siyaasadaha lacag bixinta iyo kaalmada maaliyadda ku saabsan bayaanada GHS ee la xariira bukaanka bil kasta iyo warqadaha aruurinta. Macluumaadka ku saabsan siyaasadda kaalmada GHS waxaa la heli karaa waqti kasta, kaddib marka bukaanka codsado.

## SHARUUDAHA NIDAAMKA

Siistemka Caafimaadka Gundersen waxay u hoggaansami doontaa dhamaan sharciyada federaalka, gobolka iyo xaafadda, xeerka iyo qaanuunka iyo sharuudaha warbixinta ee laga yaabo in ay quseyso hawlaha la fulliyo sida waafaqsan siyaasadaan. Siyaasaddaan waxay rabtaa in GHS la socoto kaalmada maaliyadda la siiyo si loo hubiyo warbixin sax ah. Macluumaadka ku saabsan kaalmada maaliyadda la bixiyo ee hoos timaada siyaasadaan waxaa sannad kasta lagu gudbin doonaa IRS Form 990 Schedule H.

## DIIWAANKA

GHS waxay qori doontaa dhamaan kaalmada maaliyadda si ay u fulliso kantaroolka ku habbon iyo si loola kulmo sharuudaha u hoggaansamida gudaha iyo dibadda.

## OGOLAASHADA SIYAASADDA

Siyaasadda kaalmada maaliyadda GHS waxaa la siiyay, waxaana ogolaaday GHS Financial Committee (Guddiga Maaliyadda GHS) bishii Nofeembar 27, 2017 iyo Guddiga (Booard) bisha Nofeembar 10, 2017. Siyaasaddaan waxaa la fiiriyaa muddo ka muddo. Isbaddal kasta oo la taaban karo laguna sameeyo ceymiska waa in ay soo ogolaato Guddigga GHS.

Waxay Baddashaa GL-1080

| | |
|---|---|
| Taariikhda maanta<br>(Bisha/Maalinta/Sannadka)<br>(Waa in la soo celiyo muddo 30 maalin gudahooda) | |
| Diiwaanka Caafimaadka #: | |
| Ballan Qaadaha #: | |
| Tixraacinta: | |

GUNDERSEN HEALTH SYSTEM®

**ARJIGA KAALMADA MAALIYADDA (FINANCIAL ASSISTANCE APPLICASTION)**

U dir: Siistemka Caafimaadka Gundersen (Gundersen Health

| Magaca Arjiilaha *(Kowaad, Dhexe, Dambe)* |
|---|
| |

| **CEYMISKA CAAFIMAADKA** Haddii ay haa tahay, fadlan keen macluumaadka iyo koobiga kaarka ceymiska | |
|---|---|
| Magaca iyo Cinwaanka Shirkadda Ceymiska: | Nambarka Ceymiska: |

| **GOOBTA SHAQADA:** | |
|---|---|
| ☐ Xarunta Caafimaadka Gundersen Lutheran/Kliinikadaha | ☐ Isbitaalka iyo Kliinikada Gundersen St. Joseph |
| ☐ Isbitaalka iyo Kliinikadaha Agagaarka Boscobel Gundersen | ☐ Isbitaalka iyo Kliinikadaha Gundersen Tri-County |
| ☐ Isbitaalka iyo Kliinikadaha Gundersen Palmer Lutheran | ☐ Isbitaalka iyo Kliinikadaha Gundersen Moundview |

| **FADLAN CALAAMEE DHAMAAN SANDUUQYADA HOOSE EE LAGU DABAQI KARO IYO KEEN WARQADAHA TAAGEERSAN** | |
|---|---|
| ☐ Xaq u leh Medicaid, hase ahatee ma laheen taariikhda la siiyay adeegga ama adeeg aan ku jirin ceymiska | ☐ Wuu dhintay mana laha hanti |
| ☐ Guri Laawe – Sharax: | ☐ Ku xeran xabsi ku yaal hay'adda ciqaabta |

| **FADLAN KU SOO LIFAAQ KOOBIYADA WARQADAHA LOO BAAHAN YAHAY EE SOO SOCDA, KADDIBNA DHAMAYSTIR IYO SAXIIX ARJIGA** | |
|---|---|
| ☐ Koobiyada 401K/Hawlgabnimada/CD/iwm. Bayaanada | ☐ Soo gudbi warqad sharaxda xaaladaada maaliyadda |
| ☐ Koobiyada dabada jeegga muddo 60 maalin lana xariira dhamaan dakhliga la sheegay | ☐ Koobiyada Manaafacaadka Soshal Sekuritiga (haddii lagu dabaqi karo) |
| ☐ Koobiyada bayaanada shaqo la'aanta muddo 60 maalin | ☐ Koobiyada bayaanka (bayaanada) bangiga xisaabta wareeegta iyo xisaabta keydka |
| ☐ Koobiyada bayaanka canshuurta hantida maguuraanka | ☐ Koobiyada bayaanka baaqiga deynta guriga |
| Ma buuxisay canshuurta dakhliga Federaalka? Si aad u codsatid koobiga canshuurtaada, fadlan wac 1-800-829-1040.<br>☐ Haa - Fadlan dir canshuur celinta dakhliga Federaalka ugu dambeyay iyo jadwalada taageersan.<br>☐ Maya – Fadlan sharax: | |

| Aniga waxaan dalbaday ama waxaan dalban doonaa kaalmada caafimaadka federaalka ama gobolka |
|---|
| ☐ Haa ☐ Maya – Ma aha muwaadin ☐ Maya – Dakhli ka badan inta la ogol yahay ☐ Maya – Sabab kale, maxay tahay? |

| **Sida loo Rabo Emailka:** | |
|---|---|
| Aniga waxaan fahasmanahay in emailka aan laga dhigin "encrypted" in uusan ahayn isgaarsiin sugan iyo in ay jirto xoogaa halis in macluumaadka ku jira emailada ku dhacaan meelo qaldan, helaan dad kale, ama dhexda ka qabsadaan dhinacyo saddaxaad aan loo fasaxin. Aniga waxaan codsanaa in Siistemka Caafimaadka Gundersen (Gundersen Health System) ay email iigu soo gudbiso macluumaadka la xariira Arjigaan Kaalmada Maaliyadda (Financial Assistance Application). Aniga waxaan fahasmanahay in aan la noqon karo codsigaan waqti kasta. | ☐ Haa ☐ Maya |
| Emailka: | |

| **BUKAANKA/DHINACA MAS'UULKA KA AH** | | | |
|---|---|---|---|
| Fadlan calaamee hal: ☐ Keli ☐ Guursaday ☐ Carmali ☐ Furay ☐ Kala tagay | | | |
| Magaca *(Kowaad, Dhexe, Dambe)* | Nambarka Soshal Sekuritiga | Taariikhda Dhallashada<br>(Bisha/maalinta/sannadka) | |
| Cinwaanka Jidka | Magaalada | Gobolka | Zip Code |
| Nambarka Telefoonka: | Tirada Reerka *(Bukaanka, Xaaska iyo Dadka Kugu Tiirsan)* | | |
| Xaaladda Shaqada:<br>☐Waqti Buuxa ☐Qeyb Waqtiga<br>☐Iskiisa u Shaqeysto | Magaca iyo Cinwaanka Loo Shaqeeyaha | | |

| ☐ Ma Shaqeeyo ☐Arday ☐ Hawlgab | | | |
|---|---|---|---|
| Taariikhda la Shaqaaleyay: *(Bisha/Maalinta/Sannadka)* | Mansabka: | Intee Jeer Ayaad Qaadataa Mushaar:<br>☐ Todobaad kasta ☐ Labo Jeer Todobaadkii<br>☐ Bil Kasta ☐ Labo Jeer Bil Kasta | Canshuur celin kale miyaa laguugu buuxsaday?<br>☐Haa ☐Maya<br>Haddii ay haa tahay, keen canshuur celinta kuwa adiga kugu buuxsaday. |
| Ma shaqeeyo: *(Bisha/Maalinta/Sannadka)*<br>Ka Socoto: Ku Socoto: | | Isku Celcelinta Dakhliga Guud ee ku Soo Gala Bil Kasta: $ | Bil Kasta SSI/SSDI:<br>$ |

| **XAASKA** **(Haddii lagu dabaqi karo)** | | | | |
|---|---|---|---|---|
| Magaca *(Kowaad, Dhexe, Dambe)* | | Nambarka Soshal Sekuritiga | Taariikhda dhallashada *(Bisha/Maalinta/Sannadka)* | Nambarka Telefoonka: |
| Xaaladda Shaqada:<br>☐Waqti Buuxa ☐Qeyb Waqtiga<br>☐Iskiisa u Shaqeysto ☐ Ma Shaqeeyo ☐Arday<br>☐ Hawlgab | | Magaca, Cinwaanka, Nambarka Telefoonka Loo-Shaqaeeyaha: | | |
| Taariikhda la Shaqaaleyay: *(Bisha/Maalinta/Sannadka)* | Mansabka: | Intee Jeer Ayaad Qaadataa Mushaar:<br>☐ Todobaad kasta<br>☐ Labo Jeer Todobaadkii ☐ Bil Kasta<br>☐ Labo Jeer Bil Kasta | Canshuur celin kale miyaa laguugu buuxsaday?<br>☐Haa ☐Maya<br>Haddii ay haa tahay, keen canshuur celinta kuwa adiga kugu buuxsaday. | |
| Ma Shaqeeyo: *(Bisha/Maalinta/Sannadka)*<br>Ka Socoto: Ku Socoto: | | Isku Celcelinta Dakhliga Guud ee ku Soo Gala Bil Kasta: $ | Bil Kasta SSI/SSDI:<br>$ | |

**KU TIIRSANEYAASHA** **(Haddii ay ka badan yahiin 4 ku-tiirsaneyaal, isticmaal bog kale)**

| **Magaca oo Buuxa** | **Xariirka** | **Taariikhda Dhallashada (Bisha/Maalinta/Sannadka)** | **Lagu Buuxsaday Canshuurta Sida Ku Tiirsane** | |
|---|---|---|---|---|
| 1. | | | ☐ Haa | ☐ Maya |
| 2. | | | ☐ Haa | ☐ Maya |
| 3. | | | ☐ Haa | ☐ Maya |
| 4. | | | ☐ Haa | ☐ Maya |

**DAKHLIGA KALE EE KU SOO GALA BIL KASTA** (Fadlan ku soo lifaaq koobiyada warqadahaada si aad u taageertid dakhligaan)

| | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| Mushaaro Kale | $ | Dakhliga Kirada | $ | Kabidda Xaaska (Alimony)/Masaruufka Ilmaha | $ |
| Xaqa | $ | Dakhliga Itaal Darrida | $ | Shaqo La'aanta | $ |
| Waxyaabo kale Dakhliga | $ | Manaafacaadka Ciidanka (Veterans Benefits) | $ | Korsaarka/Qeybsiga Fa'iidada | $ |

**KHARASHKA AASAASIGA:**

| **NOOCA** | **LACAGTA AAD BIXISID BIL KASTA** | **QIYAASTA QIIMAHA** | **BAAQIGA AAN LA BIXININ** |
|---|---|---|---|
| Kharashka Kirada | $ | $ | $ |
| Guriga Aasaasiga | $ | $ | $ |
| Deynta Guriga 2[aad] | $ | $ | $ |
| Guriga Labaad/Guriga Fasaxa/Dhul | $ | $ | $ |
| ☐ Waxba – Fadlan sharax sababta aadan u bixinin kiro ama aadan u qaadanin deynta guriga (mortgage): | | | |

**BAABUUR/MOOTO/BAABUURTA NASASHADA**

| **NOOCA/SAMAYSKA/MODELKA/SANNADKA** | **LACAGTA AAD BIXISID BIL KASTA** | **QIYAASTA QIIMAHA** | **BAAQIGA AAN LA BIXININ** |
|---|---|---|---|
| | $ | $ | $ |
| | $ | $ | $ |
| | $ | $ | $ |

| HANTIDA | | | |
|---|---|---|---|
| Lacagta ku Jirto Xisaabta Wareegta | $ | Lacagta ku Jirto Xisaabta Keyda | $ |
| Maalgelinta "Stock"/"Bond" | $ | CD | $ |
| 401K | $ | IRA | $ |
| 403B | $ | Wax kale/HSA/FSA | $ |

**CADDEYNTA:** Waxaan caddeynaa in dhamaan macluumaadka la soo dhaafay Dakhliga/Kharashka yahay run iyo sax. *Fadlan la soco in aan fiirin doono macluumaadka aad soo gudbisay, waxaan la kaashan doonaa warbixintaada deynta (credit report).* Aniga waxaan fahamsanahay in haddii aan Aniga oo ogsoon macluumaad aan run ahayn geliyo arjiga, in aan xaq u yeelan doonin kaalmada maaliyadda iyo in kaalmada maaliyadda ley siiyay lala noqon karo iyo in aan mas'uul ka noqon doono biilasha caafimaadka.

| WAXAA LOO BAAHAN YAHAY IN LA SAXIIXO SI LOOGA SHAQEEYO ARJIGA | |
|---|---|
| Saxiixa Bukaanka/Dhinaca Mas'uulka ka ah | Taariikhda |
| Xaaska (Haddii lagu dabaqi karo) | Taariikhda |

**Financial Assistance Policy**
**(Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda)**
**(GL-2555)**

**Lifaaqa Dambe 2**

**Heerka Dhimista (Hirgelinta Janaayo 2018)**

**Dhimista la Siiyo Qofka aan Ceymiska Lahayn:** Siistemka Caafimaadka Gundersen wuxuu bixin doonaa dhimista 54.5% ee la siiyo qofka aan ceymiska ku jirin marka la bixiyo dallacaadda aan la dhimin. Dhimistaan waxaa lagu dabaqi doonaa xisaabaadka bukaanka aan lahayn ceymiska lacag bixinta laga helo ceymiska caafimaadka iyo/ama dhinacyada saddaxaad ee lacagta bixiya.

**Dhimista Adeegyada Xaq u Yeelashada Isbitaalka Gundersen:** Arjiileyaasha la kulma heerka hantida iyo dakhliga reerka:

1. Wixii ka badan 200% FPL balse la'eg ama ka yar 225% FPL waxay xaq u leeyahiin in la siiyo dhimista 75%
2. Wixii ka badan 225% FPL balse la'eg ama ka yar 250% FPL waxay xaq u leeyahiin in la siiyo dhimista 60%
3. Wixii ka badan 250% FPL balse la'eg ama ka yar 275% FPL waxay xaq u leeyahiin in la siiyo dhimista 40%
4. Wixii ka badan 275% FPL balse la'eg ama ka yar 400% FPL waxay xaq u leeyahiin in la siiyo dhimista 15%

**Dhimista Adeegyada Xaq u Yeelashada Kliinikada Gundersen:** Arjiileyaasha la kulma heerka hantida iyo dakhliga reerka:

1. Wixii ka badan 200% FPL balse la'eg ama ka yar 225% FPL waxay xaq u leeyahiin dhimista 75%
2. Wixii ka badan 225% FPL balse la'eg ama ka yar 250% FPL waxay xaq u leeyahiin dhimista 60%
3. Wixii ka badan 250% FPL balse la'eg ama ka yar 275% FPL waxay xaq u leeyahiin dhimista 40%
4. Wixii ka badan 275% FPL balse la'eg ama ka yar 400% FPL waxay xaq u leeyahiin dhimista 15%

**Heerarka Dakhliga iyo Hantida:** Nambarada soo socda waa tilmaameyaasha saboolnimada Adeegyada Caafimaadka iyo Aadanaha 2018 ee lagu soo daabacay Diiwaanka Federal Register, Janaayo 13, 2018.

| Shakhsiyaad ka Qoyska/Reer ka | Tilmaamaha Saboolnima da (100%) | 200% Saboolnima da | 225% Saboolnima da | 250% Saboolnima da | 275% Saboolnima da | 400% Saboolnima da | Heerka Hantida (100% saboolnimad a x6) |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| 1 | $12 140,00 | $24 280,00 | $27 315,00 | $30 350,00 | $33 385,00 | $48 560,00 | $72 840,00 |
| 2 | $16 460,00 | $32 920,00 | $37 035,00 | $41 150,00 | $45 265,00 | $65 840,00 | $98 760,00 |
| 3 | $20 780,00 | $41 560,00 | $46 755,00 | $51 950,00 | $57 145,00 | $83 120,00 | $124 680,00 |
| 4 | $25 100,00 | $50 200,00 | $56 475,00 | $62 750,00 | $69 025,00 | $100,400.00 | $150 600,00 |
| 5 | $29 420,00 | $58 840,00 | $66 195,00 | $73 550,00 | $80 905,00 | $117 680,00 | $176 520,00 |
| 6 | $33 740,00 | $67 480,00 | $75 915,00 | $84 350,00 | $92 785,00 | $134 960,00 | $202 440,00 |
| 7 | $38 060,00 | $76 120,00 | $85 635,00 | $95 150,00 | $104665,00 | $152 240,00 | $228 360,00 |
| 8 | $42 380,00 | $84 760,00 | $95 355,00 | $105 950,00 | $116 545,00 | $169 520,00 | $254 280,00 |

**Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda**
**(Financial Assistance Policy)**
**(GL-2555)**

**Lifaaqa Dambe 3**

**Bixiyeyaasha iyo Waaxyada Hoos Yimaada**

Adeegyada bixiyeyaasha ku yaal goobaha soo socda, ee u shaqeeya GHS waxay hoos yimaadaan siyaasadaan.

Gundersen Lutheran Medical Center (Xarunta Caafimaadka Gundersen Lutheran) (Isbitaalka): Dhamaan waaxyada

Gundersen Clinic (Kliinikada Gundersen) Dhamaan goobaha iyo dhamaan waaxyada marka laga reebo kuwa soo socda:

- Qaliinka Lasik
- Daryeelka Chiropractic (Chiropractic Care)
- Adeegyada bacriminta (Fertility services)
- Muraayadaha jilicsan /Muraayadaha caadiga
- Qaliinka qurxinta/Adeegyada blaastiigga
- Qalabka maqalka
- Daweynta ilkaha (Orthodontics)
- Adeegyada ilkaha
- Cabbirka aragga (Optometry)

**Financial Assistance Policy**
**(Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda)**
**(GL-2555)**

**Lifaaqa Dambe 4**

**Xisaabta Guud Ahaan La Soo Dallaco (AGB) Boqolkiiba**

Xisaabta guud ahaan la soo dhallacay waa lacagta la filaayo in laga bixiyo degdegga ama adeegyada caafimaad ahaan looga baahan yahay bukaanka, iyo/ama ballan qaadaha bukaanka. Bukaanka u qalma balse aan lahayn ceymis, lacagtaan kama badan karto lacagta la xisaabin doono marka la isticmaalo Look Back Method ee ku sharaxan §1.50(r)-5(b) (3) Internal Revenue Service Code (Xeerka Adeegga Dakhliga Canshuurta). Habka Look Back Method wuxuu ku saleysnaan doonaa khidmadda adeegga Medicare iyo dhamaan ceymiyeyaasha caafimaadka gaarka ah ee bixiya kharashka sheegashooyinka. Sheegashooyinka loo baahan yahay in lagu darro xisaabinta AGB waxay ahaan doonaan sheegashooyinka la ogol yahay muddada toban iyo labada bil sannadka la soo dhaafay. Xisaabta co-insurance (wada ceymiska), co-payments (lacagaha lagu darro ceymiska) iyo lacagaha horta la bixiyo (deductible) waxaa lagu darri doonaa nambarka kore waxaana la raacin doonaa khidmadda-adeegga Medicare iyo dhamaan sheegashooyinka la ogol yahay ee laga qaato ceymisyada caafimaadka gaarka ah ee bixiya kharashka sheegashooyinka. Dallacaadda guud ee la xariirta sheegashooyinka la soo sheegay waxaa lagu darri doonaa xisaabta hoose. Lama xisaabi doono AGB in ka yar inta la xisaabo sannadkii marka la gaaro maalinta 45[aad] ee ku xigta xeritaanka sannadka la soo dhaafay, iyo fullinta maalinta 120[aad] ee ku xigta sannadka.

| **Taariikhda Hirgelinta:** | **Boqolkiiba** |
|---|---|
| Maarso 1, 2015 | 47% |
| Maarso 1, 2016 | 49% |
| Maarso 1, 2017 | 50% |
| Maarso 1, 2018 | 54.5% |
| Maarso 1, 2019 | Weli lagama gaarin go'aan |

**Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda**
**(Financial Assistance Policy)**
**(GL-2555)**

**Lifaaqa Dambe 5**

**Helitaanka Siyaasadda ee Dadweynaha**

Macluumaadka ku saabsan Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda GHS (GHS Financial Assistance Policy), iyo siyaasadda GHS Self-pay Billing and Collection Policy (Siyaasadda Bixinta Dallacaadda iyo Aruurinta) waxaa diyaar looga dhigi doonaa bukaanka iyo bulshada ay GHS u shaqeyso taasoo lagu gaaro ilo kala duwan.

1. Bukaanka iyo ballan qaadeyaasha waxay codsan karaan koobiyada Financial Assistance Policy (Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda), Self-Pay Billinga ana Collection Policy, iyo/ama Plain Language Summary (Soo Koobidda Luqadda), waxaana loogu soo diri doonaa boostada:

   Gundersen Health System
   Customer Financial Service; Mailstop: NCA3-01
   1900 South Ave.
   La Crosse, WI 54601

2. Bukaanka iyo ballan qaadeyaasha waxay koobiyada Financial Assistance Policy (Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda), Self-Pay Billing and Collection Policy (Siyaasadda Bixinta Dallacaadda iyo Aruurinta), Financial Assistance Application (Arjiga Kaalamada Maaliyadda), iyo/ama Plain Language Summary (Soo Koobidda Luqadda) ku codsan karaan telefoonka (608) 775-8660 ama (800) 362-9567, khadka. 58660.

3. Bukaanka iyo ballan qaadeyaasha waxay koobiyada Financial Assistance Policy (Siyaasadda Kaamada Maaliyadda), Self-Pay Billing and Collection Policy (Siyaasadda Bixinta Dallacaadda iyo Aruurinta), Financial Assistance Application (Arjiga Kaalamda Maaliyadda), iyo/ama Plain Language Summary (Soo Koobidda Luqadda Cad) ka soo dagsan karaan www.gundersenhealth.org/faa.

4. Bukaanka iyo ballan qaadeyaasha waxay koobiyada Financial Assistance Policy (Siyaasadda Kaamada Maaliyadda), Self-Pay Billing and Collection Policy (Siyaasadda Bixinta Dallacaadda iyo Aruurinta), Financial Assistance Application (Arjiga Kaalamda Maaliyadda), iyo/ama Plain Language Summary (Soo Koobidda Luqadda Cad), qof ahaan ka qaadan karaan goobaha soo socda:

   a. GUNDERSEN LUTHERAN MEDICAL CENTER, INC.
      1900 South Avenue La Crosse, WI
      Emergency Services
      1st Floor, Legacy Building - HM1802
      (608) 775-4078

   b. Gundersen Clinic
      1900 South Avenue La Crosse, WI
      Patient Business Services - Cashiers
      1st Floor, Clinic – CC1012
      (608) 775-4078

c. Gundersen Clinic
   3111 Gundersen Drive, Onalaska, WI
   Patient Business Services - Cashiers
   1st Floor, Clinic - CON1-091
   (608) 775-8630